



**Adeegyada maktabada  
degmada Tierp**

# Adeegyada maktabada degmada Tierp

Maktabada dhexe iyo laamaheeda ba waxaa laga helaa adeegyo lacag la'aan ah: waxaad ku isticmaali kartaa Internetka, aqrisan karta wargeysyada maalinleha iwa kuwa kale ee caalamiga, waxaad aqrisan kartaa e-mailkaaga iyo waxyaalaha ku qoran goobaha bulshada. Waxaa halkaas laga helaa saddex dhaqdhaqaaq oo carruurta loogu talagalay, bandhigyada farshaxanka, muxaadarrada dadwaynaha iyo riwaayado. Haddii aad maktabada ku soo biirto – oo aad xubin ka noqoto – waxaad heli doontaa adeegyo dheeraad ah. Tusaale ahaan, waxaad:

- ka amaahan karta buugag badan oo kala nooc ah sida kuwa carruurta, kuwa hiwaayadaha, sheekooyinka, majaladaha, qaamuusyada iwm.
- ka amaahan kartaa buugag ku qoran af-iswiidish iyo luqado kale
- ka amaahan kartaa buugagga codka, kuwa hadalka, DVD iyo buugagga luqadaha lagu barto
- ka degsan kartaa buugagga elektroonikada
- xajisan kartaa ama dib u amaahan kartaa buug
- waydiisan kartaa warbixin iyo naseexooyin ku saabsan buugagga
- ku dhaqaaqi kartaa darasaad iyo baaritaanno taarikheed
- wax ku barasho, aqriso wargeysyo ama la kaalay carruurtaada sheeko xariir dartiisa
- booqo gaadidka maktabada
- codso amaahda maktabada inter – waa amaah laga dalban karo degmo ka baxsan degmada Tierp. Kharashka boostada awgiis waa inaad bixisaa 10 kar markii wax lagaga dalbaayo maktabad aan ku oolin degmada.



## Xubin ka noqo maktabada

Markii aad codsanayso xubin ka noqoshada maktabada, waa inaad haysataa kaarka caddaynta aqoonsiga. Sida lagu siiyo kaarka maktabada awgeed, waa inaad buuxisaa foom. Waxaan kula talinaynaa inaad ku qorto afar lambar oo adiga ku gaar ah oo sir ah [PIN-code]. Afarta lambar ee sirta ah waxay ku suuragelin doonaan inaad eegto akauntkaaga mar alle markii aad doonto. Goobta ku qoran liiska waxyaalaha maktabada yaalaan, Biblinord, wuxuu furan yahay habeen iyo maalin ba, sannadka oo idil, taasoo ku suuragelin doonto inaad ka raadsato wixii aad baadi doonayso, ama ballansato wax cusub. Haddii buug aad amaahatay usan qof kale codsan, waad ku biirsan kartaa wakhtiga aaamah-sashada [www.biblinord.se/tierp](http://www.biblinord.se/tierp) ama taleefan soo dir 0293-218260.

Haddii kaarka amaahansasha u ka kummo, waa inaad daahid la'aan na war-gelisaa. Sababta ah waa in la ciribtira ku isticmaalkiisa oo aan qof kale loo suuragelin in uu ku isticmaalo.

Mudada caadi ahaan la amaahan karo waa afar toddobaad. Waxaa dhici karto muddo intaas ka kooban, waa haddii buugu u yahay buug aad loo xiseeyo. Wargeysyada toddobaadle ama bil kasta soo baxa waxaad amaahan kartaa laba toddobaad, filiimada saddex maalmood.

Haddii wixii aad amaahatay aad daahid la'aan nogu soo celin, waxaan ku soo diri doonaa warqad xasuusin ku qoran tahay. Saddex maalmood kahor taariikhda soo celinta, waxaan haddii aad doonayso ku soo diri karna dig-niinta email ama dhambalka loo yaqaanno sms. Amaahsashada waa lacag la'aan, laakin kharash ayaa bixin doontaa haddii aad la soo habsaanto soo celinta. Kharashka la soo daahida haddii u ka bato 50 kar, waxaa laga ciribtiri doonaa fursada amaahsashada. Carruurta da'dooda 18 sano ka hooseeyso u ma baahna in ay bixiyaan kharashka habsaamida.

### **Kharashka habsaamida waxaa weeyaan:**

Buugagta, nooc kasta. – 1 kar/maalintii

Filimada – 20 kar/maalintii

### **Kharashyada kale:**

Kaarka maktabada ee cusub dadka waawayn – 10 kar.

Ka amaahansashada maktabada aan ku oolin degmada – 10 kar

Koobi, wixii la haleeyo ama lummo waa in la bixiyaa qiimahiisa ama sida hadba ku quran liiska maktabada.

# Saacadaha maktabada ay furan tahay

## Maktabada dhexe ku taalla bartamahadegmada Tierp

Biblioteket.tierp@tierp.se

0293-218260

Isniin – khamiis 08.30 – 19.00

Jimce 08.30 – 16.00

Sabti 10.00 – 14.00

## Gaadiidka maktabada bokbussen@tierp.se

0293-219083, 070-3805542

## Degmada Karlholm Biblioteket.karlholm@tierp.se

0293-219480

Isniin 15.00 – 19.00

Arbaco 11.00 – 15.00

Khamiis 10.00 – 13.00

## Degmada Skärplinge Biblioteket.skarplinge@tierp.se

0293-219400

Talaado 15.00 – 19.00

Khamiis 15.00 – 19.00

Jimce 08.30 – 12.00

## Degmada Söderfors Biblioteket.soderfors@tierp.se

0293-219760

Talaado 15.00 – 19.00

Arbaco 13.00 – 16.00

## Degmada Örbyhus Biblioteket.orbyhus@tierp.se

0293-219522

Isniin 15.00 – 19.00

Arbaco 12.00 – 19.00

Khamiis 13.00 – 15.00



**TIERPS**  
**KOMMUN**